

200 University Ave. E  
St. Paul, MN 55101  
651-291-2848  
800-719-4040 (telefoon bilaa lacaga)  
[www.gillettechildrens.org](http://www.gillettechildrens.org)

## Nagala soo xidhiidh

**Su'aalaha Deg dega ha ama Tabashooyinka Telefoon kalkaliye Caafimaad**  
651-229-3890

**Su'aalihii kale ee Ku Saabsan Daryeelkaaga**  
Bukaanada Rugta Caafimaadka  
St. Paul:  
Khad Wicitaanka  
Kalkalisada  
651-578-5000

Buukaanada jooga Goobaha  
Kale:  
La xidhiidh xubin ka tirsan  
kooxda daryeelka  
caafimaadkaaga Gillette.

**Balamaha**  
651-290-8707

**Marka cusbataalka lagu jiifiyo, waxaa laga yaabaa inaadan awoodin inaad u socotid ama u dhaqdhaqaadid sidaadii hore oo kale.**

**Buuggaag, Cajalado Maqal iyo Muuqaal ah iyo Waxyaddo badan**

Raadi qalabka ku saabsan naafada, xaaladaha daawooyinka iyo taageerada daryeeli bixiyayaasha.

**Qaniimaad Caafimaad iyo Waxbarasho**

St. Paul campus, wuxuu u dhaw yahay dabaqa afaraad skyway  
**651-229-3938**  
[hre@gillettechildrens.com](mailto:hre@gillettechildrens.com)

## Kahortagadhicida/kufiddaintaaadcusbataalka joogtid

### Preventing Falls During Your Stay | Somali

**Waxbarasho bukaan**  
SRI045-SO

Dadka bukaanka ahi waa u jilicsanyihii dadka caadiga ah inay kufaan amaba dhacaan. Dadkaas bukaanka ah waxaa kamid ah kuwaan hoos ku qoran:

- Bukaanka qaba dhaawac ama xaalad kale oo ku cusub
- Ilmaha iyo caruurta
- Bukaanka qaba cudurka suuxdinta
- Bukaanka mudo hore dhici jirey

Inta aad cusbataalka ku jirtey, xaaladaada aad ku sugantahay ayaa waxaa laga yaabaa inay kugu keliftu inaad dhaqdhaqaaq samaysid si kugu adag taasina ay sababto khatar keenta dhicid. Hadaba dhaqtarkaaga ama kalkalisadaada ayaa kuu sharaxaya qiyaasta inta aad dhaqdhaqaaq samayn kartid.

Halkaan waxaa ku qoran waxyabo la doonayo in adiga iyo qoyskaagu aad ogaataan si aad uga hortagtaan dhicida inta aad cusbataalka ku jirtid.

### Marka aad sariirta jiiftid:

- Sariirta gee meesha ugu hoosaysa markii aad keligaa tahay.
- Sariirta dhinacyadeeda kor u dalac sidaas u daa mar walba.
- Hubi inaad soo dhoweysato batoonka la riixo markii aad wacanaysid kalkalisada.
- Aad isga taxadar hadii jirkaaga meel kamid ah lagu xiray ama la suray tuubooyin , layn ama tuubooyin kale.
- Markii aad ka deganaysid sariirta waa in kalkalisadu ku caawiso; hadiise aadan adigu oran uma baahni.

### Markii aad socon kartid:

- Markii aad taagantahay ama soconaysid , xiro kabo ama soksiyo aan lagu siibin, ama kabaha buudka kabniinka hadii ay maquul tahay.

- Aad isaga taxadar markii aad isticmaalysid usha bakoorada lagu socdo (cane), biraha lagu socdo markii qofku jaban yahay (crutch), kursiga dadka lagu riixo (wheelchair).
- Qabso meesha la cuskado markii aad saarantahay miiska wiisatada amaba laguu wareejinayo boosishan kale.
- Aad isaga taxadar kadib markii uu kuu dhamaado qaliinku amaba haday jirto wax lamid ah oo lagugu sameeyey isla markaana lagu suuxiyey taasi waxay keenaysaa wareer waayo waxaa keena daawada suuxinta.
- Hubi inaad qolkaaga dhexdiisa ku firdhin ama dhigin alaaboo iyo waxyabo keeni kara in lagu kufo ama jidka xiri kara.

### Ogaanshaha khatarta keeni karta dhicid:

Inta aad cusbataalka ku jirtid, waxaa dhici karta inay kuu timaado kalkaliso hubinaya inaanay kugu iman dhicid aad dhaedo, si aanad khatar u gelin loogana hortago wixii keeni kara dhicid inta aad cusbataalka ku jirtid. hadii aad khatar ugu jirtid inaad dhaedo ama ay suurta gal tahay markaa waxaa lagu siinaya warqad ay ku qoranyihii qodobadan hoos ku qoran oo la doonayo inaad raaco.

- In lagaa warhayo had iyo goor
- Lagu seexiyo sariir alaarmi leh
- Lagu seexiyo sariir xiran
- Suunka badbaadinta oo dhexda lagaaga xiro markii lagugu fariisinayo kursiga dadka lagu riixo

Fadklan kala hadal kalkalisadaada ama dhaqtarka wixii su'aal ah ama hadal ah ee aad qabto oo ku saabsan khatarta keeni karta dhicitaankaaga.